Oregon Department of Human Services

Xaraynta Cabashada Adeega iyo Sirta Macmiilka ama Warbixinta Takoorka

Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS) ma takoorto dadka. Tani waxay ka dhigan tahay in ODHS ay ka caawiso dhamaan dadka u qalma oo ayna ula dhaqmin si kale cidna maadaama da'dooda, qoomiyadooda, midabkeeda, meesha ayna kasoo jeedo, jinsigeeda, diinteeda, aragtidiisa siyaasadeed*, laxaad la'aanteeda, ama rabitaankeeda jinsiga.

Waxa aad xarayn kartaa cabasho hadii aad u aragto in ODHS ay kuula dhaqantay si ka duwan waxay doonto ha noqotee sababtu e.

Si aad ugu xarayso cabasho gobolka, waxa aad kala hadli kartaa Xafiiska U Ololaynta Badhasaabka 1-800-442-5238 (TTY 711) ama waxa aad ugu diri kartaa xafiiska warqad:

Governor’s Advocacy Office
500 Summer Street NE, E17
Salem, OR 97301
Iimayl: GAO.info@odhs.oregon.gov

* Macaamiisha SNAP waxaa laga ilaaliyay in lagu takooro waxay aaminsan yihiin.

Ha isticmaalin foomkan hadii wax kamid ah kuwa soo socdee ay tahay xaaladaadu:

1. Cabashada waxa aad ka qabtaa Xafiiska Adeegyada Farsamada Gacanta Dib u Dejinta (OVRS).

Hadii aanad ku qancin ficil ama go'aan, la xidhiidh xafiiska OVRS ee deegaankaaga ama kala hadal isku duwaha xalinta is fahanwaaga OVRS 503-945-6253.

Adeegyo sharci oo bilaash ah ayaa laga heleyaa Barnaamijka Kaalmada Macmiilka (CAP), adeega Xuquuqda Laxaad La'aanta Oregon. CAP maaha hay'ada gobol ama qayb kama aha OVRS.

Kala xidhiidh CAP:
Codka: 503-243-2081
Taleefan lacag la’aan ah: 1-800-452-1694
TTY kala hadal 503-323-9161 oo waa lacag la’aan TTY kala hadal 1-800-556-5351

2. **Cabashada waxa aad ka qabtaa Adeegyada Samofalka Ilmaha oo waxa aanad ku qancin go'aanka la gaadhay. Fadlan kala xidhiidh shaqaalaha kiiskaaga ODHS ama Xafiiska Caydha Ilmaha ee deegaanka oo waxa aad waydiisaa waxa laga samayn karo go'aanka.**

   Ha u isticmaalin foomkan waxyaabaha sida:

   - Go'aanka cudida korsashada ilmaha
   - Xukunka maxkamada ama arrimaha uu maxkamada caruurtu ay naqdinayso
   - Talaabooyinka ama go'aanada badbaadada ilmaha
   - Waxa aad dalbatay dhagaysiga kiiska la ogolaaday ama waxa aad bilawday talaabo kale oo sharci
   - Wixii kale laga soo reebo taas ee Shuruucda Maamulka Oregon ah ee 413-010-043.

Adeega macmiilka ODHS iyo filashooyinka sirta ah

Adeega macmiilka wanaagsan ayaa muhiim u ah ODHS. Waxa aad xaq u leedahay in:

- Laguula dhaqmo si cadaalad ah oo xushmad leh
- Inaad hesho macluumaad sax ah oo dhamaystiran
- Inaad hesho barnaamijyada ODHS iyo gunooyinka aad u qalanto in laguu sharaxo
- In taleefanka lagugu soo celiyo hal ama laba maalmood oo shaqo gudahood
- Inaad hesho gunooyinkaaga ama nidaamkaaga is bedelaan wakhti macquul ah, iyo
- In macluumaadkaaga caafimaadka iyo shakhsi ahaaneed la ilaaliyo sirtiisa.

Xalinta adeega macmiilka iyo cabashada sirta

ODHS waxay doonaysaa inay bixiyo adeeg macmiil oo tayo leh oo ay ilaaliso sirta macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed. Laakiin, hadii aanad ku qancin ama aad cabasho ka qabto, ODHS waxay ku talinaysaa in aad marka hore kala hadasho shaqaalaha/lataliyaha ama kala hadasho maamulaha. Laakiin, khasab kuguma aha inaad samayso sidaas kahor inta aanad xaraynin cabashada. Waxa aad xarayn kartaa cabashada adiga oo buuxinaya foomkan 60 maalmood gudahood kadib marka dhacdadu dhacdo. Foomkan waxaa lagu soo celin karaa xafiis kasta oo ODHS ah ama waxaa loo diri karaa Xafiiska U Ololaynta Badhasaabka (GAO) (macluumaadka xidhiidhku waxa uu ku qoran yahay boga kowaad).

Sidee ayay wax noqonayaan kadib marka aad xarayso cabashada adeega macmiilka

- Maamulka ODHS ayaa kuula soo xidhiidhi doona sida ugu dhakhsaha badan ee macquulka ah, laakiin wakhti aan ka danbaynin shan maalmood oo shaqo kadib marka la helo cabashadaada. (Waxay qaadan kartaa shan maalmood oo kale hadii aanad haysan taleefan.)
- Maamulaha ayaad la yeelan kartaa kulan la iskugu dayayo in lagu xaliyo cabashada. Kulanku waxa uu noqon karaa foolka-fool ama taleefanka
- Cabashooyinka aan lagu xalin kulanka waxaa dib u eegid ku samayn kara maamulayaasha ODHS ee kale oo mar kale ayay kula soo xidhiidhi karaan
- Hadii cabashadaada ay ku saabsan tahay shaqaale, shaqaalaha waxaa la gaadhsiin doonaa cabashadaada. Shaqaaluhu waxa uu xaq u leeyahay inuu ka jawaabo cabashada oo waxaa uu ka qayb geli karaa kulan kasta ama shirka taleefanka ee la qabanayo. Shaqaalaha waxaa la siinayaa fursad uu kaga jawaabo iyada oo qoraal ah cabashooyinkaaga. Wixii talaabo ka timaada cabashada shaqaale laga cawdo waxay ahaan doontaa sir
- Shaqaaluhu waxa talaabo kama qaadi karaan cida cabashada ka xaraysay
- Dhamaan cabashooyinka waxaa loo diri doonaa oo naqdin doonta GAO.

Cabashada takoorka ee laga xareeyo ODHS

Sida uu dhigayo sharciga xuquuqda madaniga ah ee federalku iyo shuruucda iyo siyaasadaha xuquuqda madaniga ah ee Waaxda Beeraha Maraykanku (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah inay dadka ku takoorto qoomiyad, midab, meesha uu kasoo jeedo, jinsiga (waxaa kamid ah aqoonsiga jinsiga iyo rabitaanka jinsiga), diinta, laxaad la'aan, aragtida siyaasadeed*, ama jawaab celin ama aar goosi cabasho xuquuq madani oo hore.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado kale oo aan ahayn Ingiriisi. Dadka qaba laxaad la'aanta ee u baahan qaab kale oo ay wax u sheegaan si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (sida, farta indhoolka, far waawayn, cod duuban, Luuqada Dadka Dhagaha La' ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'ada (gobolka ama deegaanka) ee meesha ay ka dalbanayaan gunooyinka. Shakhsiyaadka dhagaha la', dhagaha culus ama qaba laxaad la'aanta hadalka waxay kala xidhiidhi karaan USDA Adeega Gudbinta Federalka 800-877-8339.

* Macaamiisha SNAP waxaa laga ilaaliyay in lagu takooro waxay aaminsan yihiin.

Si aad u xarayso cabashada takoorka barnaamijka, Cida cabanaysaa waa inay buuxiso Foomka AD-3027, Foomka Cabashada Takoorka Barnaamijka USDA oo waxaa laga heli karaa: https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf, xafiis kasta oo USDA ah, iyada oo lala hadlayo 833-620-1071, ama iyadoo warqad loo dirayo USDA. Warqada waa inuu la socdaa magaca, cinwaanka, lambarka taleefanka, cida cabanaysaayi oo lagu qoraa sharaxa talaabada takoorka ee la sheegayo iyada oo faahfaahsan si loogu sheego Xog Hayaha Xuquuqda Madaniga ah (ASCR) nooca iyo taariikhda xad gudubka xuquuqda madaniga ah la sameeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqada waa in loo gudbiyaa Adeega Cuntada iyo Nafaqada, USDA.

Hay'adan waa bixiye fursad loo siman yahay.

Maxa dhaca kadib marka aad xarayso cabashada adeega macmiilka

Waxa aad xarayn kartaa cabashada qoraal ah adiga oo buuxinaya foomkan 60 maalmood gudahood kadib marka dhacdadu dhacdo. Baadhaha xuquuqda madaniga ah ee ODHS ayaa kugula soo xidhiidhi doona 20 maalmood oo shaqo si uu macluumaad badan uga ogaato cabashadaada. 20 maalmood oo shaqo gudahood marka aad la hadasho baadhaha, ODHS waxay kuu soo diri doontaa go'aanka qoraalka ah. Xuquuqda ka qaadashada rafcaanku waxay ku qoran tahay go'aanka qoraalka ah.

Cabashooyinka takoorka ama sirta ee federalka

Ku xad gudubka ama cabashooyinka takoorka ee lagu sheegey in ODHS ayna ku siinin adeeg lamid ah kuwa dadka kale iyaga ka duulaya da'daada, qoomiyadaada, midabkaaga, ama meesha aad kasoo jeedo, jinsigaaga, diintaada, laxaad la'aanta aad qabto sidoo kale waxaa lagu xarayn karaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga Maraykanka. Cabashooyinka takoorka federalka waa in lagu soo gudbiyaa 180 maalmood marka ay dhacdadu dhacdo. Xataa hadii aad ku xarayso cabasho ODHS, waxa aad weli xarayn cabashada federalka 180 maalmood gudahood marka ay dhacdadu dhacdo.

La xidhiidh barnaamijka gaarka ah ee ku qoran hoos si daad u hesho macluumaad dheeraad ah.

Xadidaada federalka

Takoorka rabitaanka jinsiga waxaa ilaaliyay Gobolka Oregon e may ilaalin shuruucda federalku. Gunada macmiilka Barnaamijka Kaalmada Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP) oo kaliya ayaa ilaaliyaa takoorka ku salaysan aragtida siyaasadeed ee ruuxa.

Wixii arrimo ah ee khuseeya gunooyinka SNAP

Waaxda Beeraha ee Maraykanka
Codka: 1-866-632-9992
TTY: 1-202-720-2600

Wixii arrimo ah ee khuseeya Dib u Dejinta Farsamada Gacanta

Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka
Codka: 1-800-421-3481
TTY: 1-800-877-8339

Wixii arrimo ah ee khuseeya dhamaan barnaamijyada kale

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Maraykanka
Codka: 1-800-368-1019
TTY: 1-800-537-7697

Wixii ku saabsan dalabka dhagaysiga maamulka

Hadii gunooyinkaaga laguu diiday, lagaa yareeyay, ama ay dhamaadeen, waxa aad xaq u leedahay inaad dalbato dhagaysi aad kaga doodayso. Waxa aad dalban kartaa dhagaysi oo waxa aad xarayn kartaa cabasho. Si aad u dalbato dhagaysi, buuxi foomka Dalabka Dhagaysiga Maamulka (DHS 0443). Waxa aad ka heli kartaa foomka Dalabka Dhagaysiga Maamulka xafiiska ODHS, ka dalbo foomka Xafiiska U Ololaynta Dadka ee Badhasaabka oo kala hadal 1-800-442-5238, ama kala soo deg foomka https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/forms/. Waxa aad sidoo kale la hadli kartaa Khadka Tooska ah ee Gunooyinka Shacabka 1-800-520-5292, oo ay maamusho Xarunta Sharciga Oregon iyo Adeegyada Kaalmada Sharciga Oregon.

Foomka dalabkaaga dhagaysiga waxaa lagu soo celin karaa xafiis kasta oo ODHS.

Wixii dalab dhagaysiga ah lama mid aha cabashada xaraynta. Waxaa jira mudooyin ay ku eeg tahay in lagu xareeyo dalabka dhagaysiga. Marka aad xaraynayso dhagaysiga waxa aad dalban kartaa Dhagaysuga Kiiska Lagu Muransan Yahay oo lahor geeyo Xaakinka Sharciga Maamulka.

Fiiro Gaar ah: Dalabyada ku saabsan dhagaysuga gunooyinka SNAP waxaa lagu gudbin karaa afka.

Oregon Department of Human Services

Adeega Macmiilka/Cabshada Sirka ama Warbixinta Takoorka

Wixii kaalmo buuxinta foomkan ah, waxa aad kala xidhiidhi akrtaa wax kamid ah xafiisyada ODHS. Fadlan waadax ah ugu qor.

Magaca ruuxa cabanaya:_____

Lambarka taleefanka/TTY:_____ Iimeel:_____

Ciwaanka boostada:_____

Magaalada:_____ Gobolka:_____ SIBKA:_____

Taariiqda Dhalashada:_____

4 lambar ee ugu danbeeya Lambarka Sooshal Sekiyuuritiga:_____

Ma waxa aad u xaraynaysaa ruux kale? ☐ Haa ☐ Maya

Magacaaga: _____ Taleefanka:_____

Fadlan ku calaamadi sababta cabashadaada (calaamadee dhamaan kuwa khuseeya)

- ☐ Maad helin adeeg macmiil oo wanaagsan
- ☐ Waxa aad u aragtaa in macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed aan sirtiisa la ilaalin
- ☐ Ma waxa aad u aragtaa in lagugu takooray:
  - ☐ Da'da ☐ Jinsiga ☐ Rabitaanka jinsiga* ☐ Aragtida siyaadeed†
  - ☐ Diinta ☐ Laxaad La'aan
  - ☐ Qoomiyad, midab ama meesha aad kasoo jeedo

* Rabitaanka jinsiga waxaa ilaaliyay Gobolka Oregon e may ilaalin shuruucda federalku.

† Macaamiisha SNAP waxaa laga ilaaliyay in lagu takooro waxay aaminsan yihiin.

Faahfaahinta cabashada

Yaa ku lug lahaa?_____

Goorma ayay dhacday dhacdadu? Taariikhda/saacada:_____

Goobta cabashada:_____

Fadlan sharax cabashadaada (hadii aad u baahan tahay meel dheeraad ah, ku lifaaq waraaqo dheeraad ah):

Maxaad jeclaan lahayn in ODHS ay samayso si ay u xaliso cabashadaada? Maxaad ku talin lahayd?

Saxeexa:_____ Taariikhda:_____

Kaliya waxaa isticmaalaya ODHS

Taariikhda la heley:_____

Waxaa heley (magaca oo daabacan):_____

Cabashooyinka takoorka iyo sirta, u dir Xafiiska U Olalaynta Badhasaabka cinwaanku waxa uu ku yaalaa boga 1.

Wixii ah cabashooyinka adeega macmiilka, u dir maamulaha ay khusayso.